

Halkaan kusoo gudbi geliddaada

Waa ku mahadsantahay xiiseyntaada Tartanka Astaanka the PCAT! Markaansii wadno dhegeysiga bulshada oo fahanno siyaabaha lagu daboolo baahiyaha Duwamish Valley, waxaan aqoonsannay baahida lagu sameeyo wax nagu caawin kara in si fiican naloo garto una fudud xiriirka.

Taas waa astaan!

Waxaan kugu casumeynaa inaad ka qeybgasho adigoo soo gudbinaya naqshaddaada astaan tartan si lagu metelo Port Community Action Team (Kooxda Tillaabada Bulshada Dekedda).

Tartanka Astaanta

Waxaan doonaynaa caawintaada naqshadeynta astaan taasoo metesha the PCAT iyo dabciga Duwamish Valley. Xubnaha bulshada Duwamish Valley waxaa lagu casumayaa inay soo gudbiyaan fikraddooda astaan la geliyo tartan. The PCAT waxay fiirin doonaan fikradaha waxayna xulan doonaan saddex tartame oo ugu dambaysa. Tartamayaashaan waxaa kadib lagu casumi doonaa in ay soo gudbiyaan naqshado astaan oo fiinaal ah si bulsho weyntu cod ugu qaado.

Meesha 1'aad	\$1000
Meesha 2'aad	\$500
Meesha 3'aad	\$250

Xeerarka:

Hal gelid qofkiiba

Tartamuhu waa inuu ahaado qof ku nool,, ka shaqeeya, ku ciyaara, wax ku barta, iyo/ama ku tukada xaafadaha dekedda u dhaw ee South Park iyo Georgetown ee garab dhaca Wabiga Duwamish

Soo-gudbinta tartanka waa inaysan ahayn xaquuq-daabacadeed PCAT baa keydsata xaquuqda khaaska ee farshaxanka markii la guddoomo tartanka.

Soo-gudbinta waxaa dhaca Wabiga Duwamish

Soo-gudbinta tartanka waa inaysan ahayn xaquuq-daabacadeed PCAT baa keydsata xaquuqda khaaska ee farshaxanka markii la guddoomo tartanka.

Soo-gudbinta waxaa lagu sameyn karaa qaab khad ama shaqsi ahaan (fadlan soo wac (612) 470-1772 ama iimeelgaree

duwamishvalleypcat@gmail.com)

Sharuudaha Xulashada:

The PCAT waxay dooran doonaan kuwa fiinaalka ku soo baxa ayadoo ku saleysan sida fikraduhu uga turjumayaan ujeedada iyo hiigsiga the PCAT. Waxaan sidookale qadarin doonaa hal-abuurnimada iyo saameeynta muuqaal. Halkaan waxaa ka heli xoogaa shaqooyin ah si lagu dhiirigeliyo laguna hago soo-gudbintaada.

Xaafado

Bulshada

Wabi

Warshad

Geedo

Xididdo

Wabiga Duwamish

Biyo

Deris la-xoojiyay oo wadajir ula shaqeeya Dekedda Seattle

Luuqado badan

Xaafad dhaqamo badan

Kalluun

Taariikhda u-dhaladka

Midnimo

Waqtiga xulashada:

Ayadoo rajadu tahay tartankaan in laga dhigo mid ka-qeybqaadasho badan sida ugu macquulsan, tartankaan wuxuu ku dhici doonaa dhawr waji.

Wajiga Koobaad

Dadka degan Duwamish Valley waxaa lagu casumay in ay sameeyaan soo-gudbinta tartanka ugu dambeyn March 1st 2021. Soo-gudbinnadaan bilowga ah waxay noqon karaan fikrado. Kadib xubnaha PCAT waxay ugu codeyn doonaan saddexda ugu sarreysa sharuudaha kore.

Wajiga Labaad

Saddexda fiinaalka ku soo baxda waxay la xiriiri doonaan the PCAT; wey nala kulmi doonaan, waxay wax ka baran doonaan sheekadanada asalka ah, iyo sida aan u rajaynayno in kor loo qaado codadka bulshada.

fiinaaleystayaasha waxaa kadib la weydiin doonaa in ay u beddelaan fikradaha astaamo kama-dambays ah, ayadoo wax looga beddelayo naqshadda isdhexgalka PCAT.

Markay soo khatimaan astaantooda, the PCAT waxay ku casumi doontaa bulshada in ay u codeeyaan key ugu jecelyihiin. Codeynta bulshada waxay xirmi

doontaa April 15th 2021.

Wajiga Saddexaad:

The PCAT waxay xisaabi doontaa codadka bulshadu soo gudbisay May1st 2021, waxaan iclaamin doonaa guuleystaha oo shaac-bixin doonaa astaanta cusub!

Halkaan kusoo gudbi geliddaada

Waayo Kooxda Tillaabada Bulshada Dekedda (PCAT)?

Kooxda Tillaabada Bulshada Dekedda (PCAT) waa koox la-talin ah oo bulshadu isku-keentay oo la abuuray 2017 waxayna ka koobanyihiin xubno bulshada Duwamish Valley ah oo ka la xiriira Dekedda tillaabo wada-shaqeyn iyo qorsheynta istiraatiijiyadeed si looga hadlo isku-dheellitirnaan la'aanta taariikhiga ah oo hadda jirta iyo saameeynteeda ururtay oo saameynaysa bulshada Duwamish Valley.

Maanta, the PCAT waxay u doodayaan maalgelinno, mashruucyo iyo siyaasado waxtar u leh baaxadda bulshada, bey'ad iyo bulsho caafimaadqab leh, iyo burwaaqada dhaqaaleed ee jirta. Waxaan si firfircoon u doonaa wada-shaqeynta dadka ku nool kana shaqeeya Duwamish Valley si loo aqoonsado waxyaalaha mudnaanta u leh shaqadaan.

Xog-sooyaalka iyo Taariikhda

2013, Tillaabo Caafimaad Xaq ah (Just Health Action), Iskaashi Nadiifin Wabiga Duwamish iyo Koox La-talin oo Farsamo ayaa waxay bilaabeen ka shaqeynta Daraasad Saameeynta Ururta ee Caafimaadka (CHIA). Waxaa ka soo baxay "tiro dhibaatooyin caafimaad ah iyo saameeynno si aan isle-ekeyn u saameeya dadka Duwamish Valley, aag leh tirada ugu badan ee goobaha qashinka sumeysan, meelo bey'adeed si xun loo dhisay, iyo qiiq hawo oo aad u xun markii loo fiirsho inta kale Seattle. Cimriga noolasha ee xaafadaha Georgetown iyo South Park wuxuu ka yaryahay ilaa 13 sano qeybaha qanigaa ee Seattle."

Baahi wax looga qabto natiijooyinkaan baa waxay dhalisay mashruuc tijaabo ah oo u dhexeeya Dekedda iyo the PCAT, sidookale xooga-saaraya helitaanka dhaqaaleed ee bulshada.

Duwamish Valley waxay leedahay mushtamac ballaaran oo degenayaal Isbaanish, Soomaali, Fiidnamiis iyo Khmer iskugu jira waana mid ka mid xaafadaha ugu faqiirsan Seattle.

Hal koox oo bulshada oo lala xiriiray waxay ahayd Duwamish Valley Youth Corps. Xiriirka dhallinyarada waxay ahayd qeyb muhiim ah ee mashruuca tijaabada. Waxaa loo xilsaaray inay caawiyaan fududeynta nadwo loogu

talagalay abuuridda marin dhallinyartu ku gasho Dekedda Barnaamijkeeda Tababarka Dhallinyarada ee sameynta warqadda shaqo-doonka iyo diyaargarowga xirfad. Ilaa 2018, 17 dhallinyaro baa u shaqeysay Dekedda. Intaa waxaa la jira, the PCAT waxay caawisay dardargelinta wadashaqeynada mashruucyo kale oo marin xirfadeed ah, daraasado saameeyn bey'adeed ah oo la jira Northwest Seaport Alliance, iyo mashruucyo sare-u-qadis bulsho ah sida Duwamish River Mural Art.

Markii mashruucii tijaabada u dhawaaday dhamaadkiisii, Dekedda Seattle iyo the PCAT waxay dooneen in ay sii-wadaan iskaashigooda.

May 28, 2019, guddoomiyeyaasha dekedda waxay si kala-har lahayn u gudbiyeen codsi kaasoo aasaasay Barnaamijka Sinnaanta Bulshada Duwamish Valley (DVCEP), oo rismi ka dhigaya wadashaqeynta u dhexeysa Dekedda Seattle iyo bulshooyinka Duwamish.

Bilooyinkii ku xigay, the PCAT iyo Dekedda Seattle waxay bilaabeen in ay ka wada-shaqeeyaan waxa noqday Ballanqaadka Faaidooyinka Bulshada Duwamish Valley (Community Benefits Commitment{DVCBC}).

The DVCBC waxay doontay abuuridda qaab-dhismeed loogu talagalay wadashaqeyn sii socota oo loo marayo saddex siyaabo:

1. Awood Dhisidda Bulshada
–Sidee baan uga faaiidnaa oo u wadaagna dhaqaalaha si markaa bulshooyinka oo dhan u kobcaan? Dekedda oo mareysa dariiqeeda nidaam iyo bulshooyinka Duwamish Valley oo maraya tabarucaadyada la xiriira dhaqanka iyo dhaqaalaha?
2. Bulshooyinka iyo Bey'adda Caafimaadka leh –
Sidee baan u wadashaqeynaa si loo hubiyo dadka inta ugu badan saameeynta xun kasoo gaartay sinnaan la'aanta cadaaladda bey'adeed inaysan ku sii jirin u dulqaadashada cawaaqibta ku noolaanshaha albaabka ku xiga warshadda?
3. Burwaaqada Dhaqaaleed ee Jirta – Sidee kulli inta shaqeysa, ku nool, oo wax caabuda u sameeyaan xiriir is-wadi kara si loo ilaaliyo qofkasta oo taariikh ahaan joogay dooxada si loo caawiyo ka-hortagga barakaca.

Afartii bilood oo ku xigtay, the PCAT waxay hogaamisay dadaallo wargelin si loo xaqiijiyo DVCBC in lagu saleeyo codadka bulshada. Waxay iskood ula xiriireen daneeyayaasha bulshada ayagoo wargelinta meeshooda ugu geynaya. Kulamo, soo-bandhigyo, iyo wadasheekeysiiyo mid mid ah oo loo marayo marinno dhaqan ahaan iyo af ahaanba awood-fahan leh baa waxay ahaayeen qaababka

kuwaasoo the PCAT ku raadisay helidda xogta ku aadan waxa bulshadu dareentay wada-shaqeyntu inay u ekaato.

Wargelinta waxaa ka mid ahaa Soo-wareejin Doon Luuqado badan oo Duwamish ah oo iskaashi la leh Dekedda Seattle. Si qeyb ka ah xeeladdeeda wargelin, the PCAT waxay caawisay hogaaminta naqshad loogu talagalay soo-wareejin doon deyr oo ku saleysan tiirarka DVCBC.

Hadda, the PCAT iyo Dekedda Seattle waxay dhisayaan qorsho shaqo kaasoo dhaqan-gelin doona waxyaalaha mudnaanta la siiyay ee ku-xusan DVCBC.

Sidookale the PCAT waxay ka shaqeyn doontaa sharciyada hay'adeed markay bilowdo sameynta awood dheeri ah xagga u sii adeegidda bulshada.

Akhris dheeraad ah waxaa laga heli karaa hoos:

Daraasadda Saameeynta Caafimaadka Ururtay ee Duwamish Valley 2013

<https://www.duwamishcleanup.org/chia>

Mashruuca Tijaabada Cadaaladda Bey'adeed EPA US ee TAG wuxuu abuuraa iniin taasoo aakhirka noqon doonta PCAT:

<https://www.epa.gov/community-port-collaboration/pilot-projects-port-and-near-port-community-collaboration>

Codsi rismi looga dhigay PCAT 5/28:

<https://www.portseattle.org/sites/default/files/2019-06/Motion%202019-07-%20Duwamish%20Equity%20Program.pdf>

Sharciga 3767 kaasoo PCAT hay'ad ahaan ku xiray Dekedda 12/19:

<https://www.portseattle.org/sites/default/files/2020-01/Resolution%203767%20with%20Exhibit.pdf>

Aragtida PCAT kaddib markii la baasgareeyay Sharciga 3767

<https://iexaminer.org/coming-closer-the-duwamish-valley-community-benefits-from-commitment/>

Sheekada Dekedda ee gudbinta Sharciga 3767

<https://www.portseattle.org/news/port-seattle-expands-equity-program-duwamish-valley>

Waa maxay Sharciga 3767: Ballanqaadka Faaiidooyinka Bulshada (CBC)?

Wareegtada Sharuucda Ballanqaadka Faaiidooyinka Bulshada ee Duwamish Valley (ballanqaadka) waxaa loogu talagalay hagidda arjiga Barnaamijka Sinnaanta Bulshada Duwamish Valley (DVCEP) iyo hawlfulinno kale oo dekedda kuwaasoo saameeya bulshada Duwamish Valley. Ballanqaadku wuxuu ka caawiyaa Dekedda Seattle hormarinta hawlgalkeeda kobcinta burwaaqo dhaqaaleedka iyo tayada noolasha ee aagga ayadoo lagu dhiirigelinayo ganacsiga, dalxiiska, shaqaaleynta iyo shaqo-abuurka qaab loo simanyahay, isla-xisaabtan leh oo bey'adda u roon. Wadashaqeynta Kooxda Tillaabada Bulshada Dekedda (PCAT) ee la jirta guddiga la-talinta xaafadda waa in ay hubiso DVCEP in ay gaarto saddex gool oo guud:

1. Awood-dhisidda Bulshada iyo Dekedda oo loogu talagalay wadashaqeyn socota
2. Bulshooyinka iyo bey'adda caafimaadka qabta
3. Burwaaqada dhaqaaleed ee jirta

Awood-dhisidda

Si waafaqsan hindisooyinka sinnaanta dekedda si wax looga qabto midabtakoorka nidaamsan iyo ayadoo la aqoonsanayo qaababka ugu waxtarka badan ee xallinta sinnaan la'aanta in ay ka yimaadaan bulshooyinka ruuxooda, DVCEP waa in ay dhistaa awoodda bulshada iyo dekedda si lagu hubiyo xiriir iyo iskaashi macno-leh oo loo simanyahay. Ilaa dirifkaan, DVCEP waxay dhiirigelin doontaa go'aan-sameyn la-wadaago, taageeridda hogaamiyayaasha bulshada ee hadda jooga iyo kuwa imaan doona, iyo kala shaqeynta bulshada hawlaha sare-u-qaada natiijooyinka faaiidooyinka wadareed leh.

Meelaha tillaabada dekedda waxaa ka mid ah, laakiin kuma koobna:

- Wadajir
- Tababar iyo Waxbarasho
- Bulshada
- Xiriirka Bulshada
- Ra'yi-celinta Bulshada
- Wadashaqeynta Hay'adaha dhexdooda
- Natiijooyin Xog ku-saleysan

Bulshooyinka iyo bey'adda caafimaadka qabta

Dekedda waxay si hormar leh wax uga qabanaysaa isbeddelka cimilada iyo asbaabta bey'adeed ee kale oo saameynaya caafimaadka bulshada. DVCEP waxay dardargelin doontaa hawlaha xiriirka bulshada kuwaasoo sare u qaadi doona natiijooyinka faaiidooyinka wadareed leh.

Meelaha hawlgalka dekedda waxaa ka mid ah laakiin kuma koobna:

- Isbeddelka Cimilada
- Tayada hawada
- Taraafiga Taraagyada
- Saameeynta Sharqanta
- Beeraha Raaxada ee Dadweynaha iyo Meelaha Doogga
- Tayada biyaha

Burwaaqada Dhaqaaleed ee jirta

Dekedda waxay dardargelin doontaa xeelado kahortag barakac ah kuwaasoo u oggolaan doona Bulshada Duwamish Valley in ay ku burwaaqowdo marinka loo simanyahay ee tababarka, shaqaaleynta, doorarka xirfadeed iyo fursadaha dhaqaaleed ee la xiriira dekedda. DVCEP waa inay dhiirigeliso wadashaqeynta kooxeed ee barnaamijta horumarinta dhaqaaleed ee lagu gaaro natiijooyin faaiidooyin wadareed leh.

Meelaha hawlgalka dekedda waxaa ka mid ah laakiin kuma koobna:

- Shaqaaleynta iyo Shaqaalo-haynta
- Horumarinta Shaqooyinka Dhallinyarada
- Horumarinta Shaqooyinka Dadka waaweyn
- Horumarinta Dhaqaalaha
- Taageero loogu talagalay Dhaqaale Loo-simanyahay, Kala-duwan oo Doog ah

Arag Sharciga 3767:

Ballanqaadka Faaiidooyinka Bulshada oo dhameystiran:

[English](#)

[Spanish](#)

[Khmer](#)

[Vietnamese](#)

Maxay shaqadaan muhiim u tahay

Duwamish Valley waxaa muddoo dheer lagu tilmaamayay in ay tahay bulsho leh cadaalad-darro bey'adeed—bulsho leh culaabyo caafimaad bey'adeed aan aad iskugu dheellitirnayn iyo khataro oo leh faaiidooyin bey'adeed kayar inta kale ee Seattle. Xaafadaha qarka u saaran wabiga Duwamish Valley waa South Park iyo Georgetown, guriga degenayaasha kuwaasoo ka mid ah dadka saameynta ugu badan ka soo gaartay Superfund Site ee leh dhibaatooyinka suurtagalkaa ee ka imaada haraaga sumeysan oo gaara xeebaha xaafadeed, ku dabaalashada ama

ku dhex-socodka wabiga, iyo ka kalluumeysiga. South Park iyo Georgetown waxay ka mid yihiin xaafadaha ugu dakhliga yar ee Seattle, oo khaasatan South Park waa mid ka mid ah xaafadaha qoomiyad ahaan ugu kala-duwanaa badan ee magaalada. Intaa waxaa la jira, taariikhiyan waxay la'aayeen marinka iyo saameynta go'aan-gaarayaasha qaabeeya mustaqbalka bulshooyinkooda sida bulshooyinka kale ee taajirka ee deegaanka u haystaan.

Cimriga noolasha ee Duwamish Valley wuxuu ka yaryahay sideed sano Magaalada Seattle iyo King County isku-celcelis ahaan. Intaa waxaa la jira, degenihiiba wuxuu marin u leeyahay 40 taago oo wareeg ah oo keliya oo meel doog ah meesha 387 taago oo wareeg ah isku-celcelis ahaan degenihiiba haysto gudaha xuduudaha Magaalada Seattle, iyo qiiqa hawada ee tirada aan isku-dheellitirnayn ee ka imaanaya warshadaha qiiqaya iyo sidookale wadooyinka waaweyn ee ku wareegsan (State Highways 99 iyo 509, iyo Interstate 5). Asbaabtaan waxay isku-darayaan soo saaridda bulsho wajahaysa kala-dhimanaan dhaqaaleed, caafimaad halis ah, iyo nabadgelyo dadweyne kuwaasoo waajibinaya bulsho u-doodis iyo maalgelin nidaameed wax lagu hagaajiyo.

[Nala Soo Xiriir](#)

FB [Kooxda Tillaabada Bulshada Dekedda Duwamish Valley](#)

IG [Kooxda Tillaabada Bulshada Dekedda Duwamish Valley](#)